

# Sidatan ayaa hoyga daryeelka iyo xannaanadda (vård- och Omsorgsboende) u dooran karta



# Awoodda doorashada waxay keenta in hab fudud hoyga daryeelka iyo xannaanadda Stockholm lagu doorto.

**Adiga oo lagu oggolaaday in hoyga daryeelka iyo xannaanadda Stockholms stad laga siiyo, waxaad dooran karta guriga aad doonayso. Tusaale ahaan waxaad dooran karta guryaha degmooyinka ama kuwa shirkadaha ay leeyihiin, oo ah kuwa maamulka degmada heshiis la galay. Awoodda doorashada waxaa ka reeban kuwa loo yaqaanno (service-husen), laakinse xitaa kuwaas waa laga hirgelin doona.**

## **Hoyga daryeelka iyo xannaanadda**

Hoyga daryeelka iyo xannaanadda waa magac guud oo ah aqallo habeen iyo maalin ba leh adeeg iyo xannaanad. Hoyga waxaad ka heli karta wax alle wixii caawinaad ah.

## **Yaa loo oggolaan karaa hoyga daryeelka iyo xannaanadda?**

Adiga oo da'daada ah 65 sano jir ah oo hab culus oo joogto ah ugu baahan hoy daryeel iyo xannaanad leh, kuwaasoo (hemtjänst) aadan ka heli karin ayaa hoyga daryeelka iyo xannaanadda loo oggolaan kara. Baahida culus waxaa loola jeeda baahida caawinaada joogtada ah ee habeen iyo maalinba ah.

## **Sidatan ayaa hoyga daryeelka- iyo xannaanadda loo codsan kara**

Haddii aad doonayso inaad hoyga daryeelka iyo xannaanadda codsato waxaad arrintaas kala xiriiri karta maamulka xaafadda (stadsdelsförvaltning), oo aad ka tirsan tahay, waxaa codsigaaga qaabbili doono qof gacanhaaye ah. Gacanhaayehu wuxuu baari doona baahida aad daryeelka iyo xannaanadda u qabto, kadib na wuxuu go'aan ka gaari doona codsigaaga.

## **Adiga ayaa goobta hoyga go'aan ka gaari karo**

Adiga oo lagu oggolaaday hoyga daryeelka iyo xannaanadda waxaad xaq ku leedahay

inaad doorato hoyga aad doonayso inaad u guurto. Gacanhaayeha wuxuu ku siin kara wixii warbixin ah iyo caawinaadda aad u baahan tahay sidii aad hoygaaga ku dooran lahayd. Warbixin faahfaahsan oo ku saabsan guryaha aad dooran karto waxaad ka heleysa hoyga Internetka ee magaaladda, [www.stockholm.se](http://www.stockholm.se)

### **Waxa jirto fursado oo aad isla markiiba saddex saf ku geli karto**

Haddii hoyga daryeelka iyo xannaanadda aad doonayso uu buuxo, waxaad hoygaas u geli karta saf. Waxaad kaloo isla markiiba saf u geli karta saddex saf oo kala duwan. Hoyga daryeelka iyo xannaanadda ugu horeeyo ee boos lagaga helo ayaa hoy laga siin doona.

### **Waxaa laga ballan qaadayaa in laba bilood gudahood hoy lagu helo ama lagu siiyo**

Haddii muddo laba bilood gudahood lagu helin aqalkii aad doonaysay, waxaa aqal u qalma oo kumeelgaar ahaan laga siinaaya goob kale. Macneheedu waxay tahay in adiga oo haatan ku nool hoyga daryeelka

iyo xannaanadda, aad aqalka iska beddeli karto markii aqalkii aad dooratay lagu helo.

### **Kharashka waa intee?**

Kirada aqalka ka sokkoow waxaa bixin doonta kharashka daryeelka, xannaanad iyo cuntada. Inta aad bixin doonto waa arrin daqligaaga ku xiran. Warbixin faahfaahsan ku saabsan sida kharashka loo xisaabiyo waxaad ka heli karta gacanhaayeha.

### **Warbixin faahfaahsan**

Wixii su'aallo ah ee ku saabsan xannaanadda waayeeladda ee Stockholms stad waxaad kala xiriiri karta (Äldre Direkt) adigoo waca 08-80 65 65 ama warqad su'aashaada ku qoran ku soo hagaajiya [aldredirekt@adeeg.stockholm.se](mailto:aldredirekt@adeeg.stockholm.se)

# Maamulada xaafadaha

## **Bromma**

Box 206, 161 26 Bromma  
Tal 08-508 06 000

## **Rinkeby-Kista**

Box 7049, 167 07 Kista  
Tal 08-508 01 000

## **Enskede-Årsta-Vantör**

Box 81, 121 22 Johanneshov  
Tal 08-508 14 000

## **Skarpnäck**

Box 5117, 121 17 Johanneshov  
Tal 08-508 15 000

## **Farsta**

Box 113, 123 22 Farsta  
Tal 08-50 818 000

## **Skärholmen**

Box 503, 127 26 Skärholmen  
Tal 08-508 24 000

## **Hägersten-Liljeholmen**

Box 490, 129 04 Hägersten  
Tal 08-508 22 000

## **Spånga-Tensta**

Box 4066, 163 04 Spånga  
Tal 08-508 03 000

## **Hässelby-Vällingby**

Box 3424, 165 23 Hässelby  
Tal 08-508 04 000

## **Södermalm**

Göta Ark 200, 118 72 Stockholm  
Tal 08-508 12 000

## **Kungsholmen**

Box 49039, 100 28 Stockholm  
Tal 08-508 08 000

## **Älvsjö**

Box 48, 125 21 Älvsjö  
Tal 08-508 21 000

## **Norrholm**

Box 3128, 103 62 Stockholm  
Tal 08-508 09 000

## **Östermalm**

Box 24156, 104 51 Stockholm  
Tal 08-508 10 000



**STOCKHOLMS STAD**

Tal Äldre Direkt 08-80 65 65, [www.stockholm.se](http://www.stockholm.se)